

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Galmudug
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha



Galmudug State
Ministry of Finance & Economic Development

جمهوریة الصومالية الفدرالية
حكومة اقليم جلمندج
وزارة المالية وتنمية الاقتصاد

Taariikh: 27/12/2018

Mudane Wasiir,

Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Galmudug waxaa ay sida ay dhigeyaan Qaybta 30 (3) iyo Qaybta 33 (2) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (*PFM Act*) ay dhammaan Wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda uga baahan tahay in ay Wasaaradda Maaliyadda u soo gudbiyaan dhammaan maaliyadaha deeq-bixiyeyaasha (kaash ama mid aan kaash ahaynba) ee aan la soo marin miisaaniyadda muddo toddoba (7) maalmood gudahood ah oo ka bilaabma marka heshiiska lala saxiixdo deeq-bixiyaha ama deeq-bixiyuhu uu maaliyadda u xaqiijiye Wasaaraddaada.

Macluumaadka la soo gudbinayo waa:

- nuquallada heshiiska iyo/ama
- heshiiska isfahamka, iyo
- faahfaahinta maaliyadsiinta waa in lagu qoraa Foomka 5aad (halkaan ku lifaaqan)

Macluumad waxaa loogu baahan yahay in lagu daro bayaamada maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug

Marka maaliyadsiinta deeq-bixiyaha lagu bixiyo kaash, waxaa waajib ah in loo hoggaansamo Xeer-nidaamiyaha #5 iyo Tilmaanta #I ee la xiriira furista iyo mareynta xisaabaha bankiyada.

Fadlan Waaxda Miisaaniyadda kala soo xiriir telefoonka: **0615556910/0617952251** ee Wasaaradda Maaliyadda haddii aad gacansiin u baahato.

Mahadsanid,

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda & Hor. Dhaqaalaha

Siciid Siyaad Shirwac



Development
Project Formulas

Enc.